Sidaan ayaad isu diyaarin kartaa

Waxaa muhiim ah in adiga iyo qaraabadaada la idin siiyo warbixin ku saabsan caafimaadkaaga iyo sida ay saameyn ugu yeelan karto xaaladaada mustaqbalka.Haddii aad dareento/dareentaan in wax maqanyihiin waxaad wada hadal qaas ah la yeelaneysaa dhaqtarkaaga ama qof kale oo ku shaqo leh daryeelkaaga.

Fadlan sii qor baahidaada, fekerkaaga iyo su'aalaha aad qabto si jawaab laguu sii siiyo.

Qoraalkaaga qaaska ah

_____

_____

_____

_____

_____

_____

_____

_____

Region Örebro län

Postadress: Region Örebro län, Box 1613, 701 16 Örebro **E-post:** regionen@regionorebrolan.se
Besöksadress: Eklundavägen 2, Örebro **Tel:** 019-602 70 00 **Fax:** 019-602 70 08
www.regionorebrolan.se

Qorshaynta daryeelkamarka dhaqtarka lagaa soo saaro

Macluumaad loogu talo galay qofka isbitaalka ka soo baxay oo kaalmo uga baahan degmada ama bukaan socod eegtada.

Waqtiga iyo goobta bixitaankeyga loo qorsheeyay

.....

Region Örebro län

Ujeedada loo qorsheynaayo daryeelkaaga caafimaad waa sidaa dib ugu laaban lahayd nolol xor ah marka isbitaalka lagaa saaro ka dib.

Waa maxay qorshaynta daryeelka intaan isbitaalka ka bixin?

Qorshaha daryeelka marka aad isbitaalka ka baxaysid waa kulan aad wada yeelaneysaan adiga, haday suurto galtahay qaraabadaada iyo shaqaalaha degmada iyo gobolka.Waxaad ka wada hadleysaan baahidaada iyo taagerada aad u baahan tahay markaad isbitaalka ka baxdid.

Oggolaasho

Warbixin ku saabsan xaaladaada caafimaad iyo baahidaada ayaa waxaa is dhaafsanaaya degmada iyo gobolka laakiin waa in adiga oggolaasho lagaa helaa si laysu dhaafsado.

Qorshaynta waxay noqon kartaa

- daryeelkaaga shaqsi ahaaneed
- daawooyinkaaga
- baahidaada tababar iyo qalabkaad u baahantahay
- qaraabadaada waxay kaa caawini karaan
- baxnaanada guriga
- caqabadaha guriga ama deegaanka kugu xeeran

Degmada waxaad ka dalban kartaa taageero ku saleysan baahidaada.Qof mas'uul ah ayaa baaritaan ku sameynaya codsigaaga iyo caawinaada aad xaqa u leedahay.

Yaa ka qayb qaadan kara?

Qorshaynta waxaa ka qayb qaadanaaya adiga iyo shaqaalaha degmada.Haddii aad dalbato qaraabadaada waa ka qayb qaadan karaan. Shaqaalaha isbitaalka iyo/ama xarumaha caafimaadka waa ka qayb qaadan karaan. Haddii loo baahdo waxaa laguu qabanaayaa turjubaan.

Marka shirka dhamaado ka dib

Markaad isbitaalka ka baxeysid waxaa lagu siinaa qorshe ah sidaa ku heli lahayd daryeel qorsheysan oo joogto ah. Qorsha waxa uu shaqeynaa markaad isbitaalka ka baxdid. Markaas ka dib waa la sii wadaayaa marwalbana waxaa taagerada lagu saleynaa hadba baahidaada siday tahay.Qorshaha ka sokow waxaa lagu siinaa qoraal kooban oo ah mudada daryeelka caafimaadka soconayso iyo macluumaad la xiriira daawooyinkaaga.